



**ARAGTIDA ISTARAATIJIYADEED  
IYO QORSHEYNTA HANTIFA  
2018 – 2020  
MUUQAALKA 2020-2030**

**AASAAS U DHIGIDDA GURYAHA DADKA DAKHLIGOODU HOOSEEYO - 50KA SANO EE SOO  
SOCDA**

**OO UU ANSIXIYEEY GUDIGA MAAMULKA  
23KII MAAJO 2018**

# FIKRAD KA BIXIN MPHA

## Hal ku Dhageenna

Inaan dhiirigelino oo aan dhaqangelino guryo si hufan loo maamulay oo bulshada isku dhafka ah, dakhligoodu yar yahay iyada oo maanka lagu hayo fayo qabka shaqsiyaadka, qoysaska iyo bulshada aan u adeegno.

**42**  
Guryo dabaqyo  
dhadheer oo  
**5,006**  
Qolal ah

**26,000+**  
Oo dad ah degan  
yihiin

**746**  
Guryo kelida u  
taagan/guryo  
dhinaca isku haya

**184**  
Guryo dhinaca isku  
haya

**~6,000**  
Lacagta laga bixiyo  
(foojar)  
**710**  
Lacag bixinta  
mashruuca ku  
saleysan

# QEEXITAANKA DHIBAATADA

**Waafaqsan hawgalka MPHA's** ee siinta hoy qoysaska dakhligoodu yar yahay, MPHA waxaa waajib ku ah in ay raadiso **maalgelin cusub ee dadweynaha iyo kuwa gaarka ah** si loo dhqangeliyo qorshaha hantida ma guurtada ah **loona dheereeyo mudada isticmaalka ee guryaha MPHA ee dadka dakhligoodu yar yahay** ee mustaqbalka.


**Dhaqaalaha ay ku hawgasho oo aan ku filneyn**

*iyoo*

**Maalgelinta Hantida oo aan ku Filneyn**

*Taasoo keenta*

**Yaraanta Maalgelinta**



# MAAMULKA GURYAHA EE MPHA WUXUU U ADEEGAA BAAHIDA DARAN EE GURIYEYNTA

Xaaladda dhaqaale ee adag iyo baahida sii kordheysa ee guryo dadku awoodo, waxa ay MPHA xoogga saartay guryo si joogto ah hoy ugu noqda dadka dakhligoodu yar yahay iyada oo maanka lagu hayo faydada qabka degnayaasha iyo ka qeyb galayaasha.

## HAL ABUURKA ISTARAATIYADEED EE MPHA



### **Abuuritaanka & Dib U habeynta Guriyeynta**

- Dayactirka iyo ku kordhinta guryo cusub marka ay suurogal tahay – daaraha dhaadheer, guryaha dhinaca isku haya iyo kuwa kaligood taagan.
- Dhaqangelinta Barnaamijka Dayactirka ee Tayada Sare leh ee Guryaha aan weli helin maalgelin dib u habeyn.
- Isku dhafka ilaha dakhliga iyo maalgelinta – dhulka, bartilmaameed ka dhigashada lacag bixinta mashaariicda guryaha ku saleysan.
- Abuuritaan guriyeyn ku saleysan waxqabadka qoyska ee dhinaca waxbarasahada iyo shaqaaleynta.
- Dib u abuuritaanka barnaamijka shaqada ee deganayaasha.
- Kordhinta helitaanka adeegga caafimaadka ee guryaha MPHA.



### **Waxbarshada, Shaqaleynta & Caafimaadka**

- Kordhinta ka qeybgalka hay'adda iyo xoojinta shaqaaleynta cududda shaqaale iyada oo xoogga la saarayo qoysaska MPHA.
- Mideynta nidaamka hawlqabadka ee IT; horumarinta nidaamka ganacsiga.
- Dhaqangelinta horumarinta joogtada ah.



### **Wanaajinta Hawgalka**

# QORSHAHA MAALGELINTU WAXA UU U BAAHAN YAHAY XAL MUDADA GAABAN IYO MUDADA DHEER

Mudada tobanka sano ee soo socota, MPHA waxa ay dhaqan gelineysaa sadex istaraatiijiyad oo lagu dayactirayo guryaha iyada oo dhiseysa guryo cusub, hadba dhaqaalugu u saamaxo.



## Dadaalka iyo Baaritaanka Tijaabada ah

- Dayabctirka ama dhisitaanka guryo waafaqsan heerka beekhaaminta tamarta ee qarniga 21aad (21st Century) iyo farsamada casriga ah.
- Dhismaha waxaa ka mid ah duminta iyo dib u dhis u dhiska guryo cusub.
- Talo soo jeedinta naqshadeynta:
  - Tamarta: heerka tamarta ee guryaha, tayada hawada
  - Ku noolaashaha: gelitaanka, naqashadda qolalka, **amaanka**, goobaha dadka u dahxeeya
  - Isku xirka bulshada: Kheyraadka Bulshada



## Dayactirka iyo Dhismaha

- Dib u habeyn buuxda oo lagu sameeyo oo ay ka mid yihiin muuqaalka guud, habka dhismaha iyo guryaha.
- Dhismayaasha cusub waxaa ka mid ah duminta iyo dhismaha guryo waafaqsan heerka guryaha.
- Deganayaasha oo loo raro goobo ku meel gaar ah oo isla degaanka ah ama meelo ka baxsan. Dhamaan deganayaasha si ku meel gaar ah loo raro waxa ay xaqu leeytihiin in dhismaha dib loogu celiyo.




## Barnaamijka Dayactirka ee Tayada Sare leh (QMP)

- Horumarinta dhulka laga galo guryaha, nadaafadda, la dagaalanka cayayaanka, dayactir guud oo lagu sameeyo nidaamka.
- Jadwal todobaadle, bil kasta, sadexdii biloodba mar, ama xilliyeed oo muujinaya waxqabadka.
- Liis hubin oo loo sameeyo guri kasta – oo muujinaya dayactirka iyo waxyaabaha laga bedelay oo duugoobay iyo xilliga rinjiyeynta.

# DEGANAYAASHA OO RA'YIGOODA LA WEYDIIYO

## MARXALAD KASTA

Naqshadda ilaa dhameystirka, MPHA waxa ay la shaqeyneysaa deganayaasha iyo dhinacyada kale ee daneynaya si loo xaqiijiyo in ay daboosho baahida deganayaasha iminka iyo mustaqbalka.



# ABUURITAANKA & DIB U HABEYNTA GURIYEYNTA *GURYAHA* DHAADHEER EE DADKA DA'DA AH

MPHA waxa ay dhameystireysaa guryaha dhaadheer si ay ula socdaan heerka guryaha ee qarniga 21aad iyo farsamada iyo naqshadda casriga ah si loo hagaajiyo gurayah sii duqoobaya. *HADAFKA: Baakhaaminta tamarta/abuuritaanka; wanaajinta xaalad nololeedka, amaanka iyo fududeynta gelitaanka guryaha ee dadka naafada ah iyo kuwa da'da ah.*

2018-2019    2020-2024    2025-2029    2030→

- **Tijaabada: 87 guri**, Si buuxda loo dayactiray oo la gaarsiiyey heerka guryaha ee beekhaaminta tamarta.

- Loo istimaalay wareejinta ama RAD ay wareejisay Hay'adda samafika ee hoos timaadda MPHA.

- Loo istimaalay wareejinta ama RAD ay wareejisay Hay'adda samafika ee hoos timaadda MPHA.

- **Darajada: Si buuxda loo dayactiray oo la gaarsiiyey heerka guryaha ee beekhaaminta tamarta.**

- **QMP:** Jadwal u sameynta dib u habeynta dhexdhexaadka ah iyo bilowga dib u habeynta qolalka guryaha

Elliot Twins  
Apartments  
(Guryaha isku  
dhagan ee Elliot)



1710 Plymouth Ave  
809 Spring St NE  
1900 3<sup>rd</sup> St NE



Daaraha  
Dhaadheer ee  
kale





# BUURITAANKA & DIB U HABEYNTA GURIYEYNTA *GURYO* *DHINACA ISKU HAYA*

MPHA waxa ay dayactir ku sameyneysaa guryaha oysaska iyada oo dhiseysa guryo cusub hadba sida dhaqaaluhu u saamaxo. *HADAFKA: Dayactirka; dhismayaal cusub.*

2018-2019

2020-2024

2025-2029

2030→

## Guryaha dhinaca isku haya ee Glendale

184 guri



- **Tijaabada QMP:** Jadwal u sameynta dib u habeynta dhexdhexaadka ah iyo bilowga dib u habeynta qolalka guryaha (oo ay ka mid tahay u diyaarinta cimilada, rinjiyeynta). (2018)
- Hay'adda samafalka ah ee MPHA oo baabi'isay ama adeegsatay RAD si loo abuuro Ilaalinta Deganayaasha ee Lacag Bixinta (Foojar). (2018)
- Diyaarinta RFQ ee ka qeybgalka la taliyayaasha bulhada si qordhe dib u horumarin ee deganayaasha iyo bulshada. (2019)

## Guryaha dhinaca isku haya ee Minnehaha

16 guri



- **Dhismaha:** 16 guri cusub oo ah guryaha dhinaca isku haya ee qoysaska hoy la'aanta ahaa. (2018/2019)



# ABUURITAANKA & DIB U HABEYNTA GURIYEYNTA

## GURYAHA KALA BAAHSAN (FIRIRSAN)

MPHA waxa ay dib u cusbooneysiin ku sameyneysaa guryaha si ay ula socdaan heerka guryaha ama dhiseysaa dhismayaal cusub isla goobta. *HADAFKA: Beekhaaminta tamarta/abuuritaanka; kordhinta cufnaanta.*

2018-2019

2020-2024

2025-2029

2030→

### Guryaha kala baahsan (firirsan)

746 guri oo hal qorshe kuwada jira

577 guri ikeli u taagan ee qoysaska

68 guryo is dul saaran

12 afar is dul saaran ah

#### Tijaabada:



- Dayac guud ee **guryaha kelida u taagan** ee qoysaska si loo gaarsiiyo heerka guriyeynta.



- Dhisidda guryo **afar afar guri isugu dhegan** ee tamarta beekhaamiya guryaha afar afarta u dhisan

- Adeegsiga Hay'adda samafalka ah ee MPHA ee dhaqaale lagu maalgeliyo guryaha kala durugsan (Abuureysaa Bixinta Kirada ee Ilaalinta Deganayaasha)

#### Darajada:



- Si buuxda loo dayactiray oo la gaarsiiyey heerka guryaha ee beekhaaminta tamarta.**

- Raadin hay'ado damaanad qaada guryaha cagaaran ee farsamada casriga ah ee tamarta.

- Duminta oo ku bedelidda guryo afar afar isu dul saaran (100+ guri)

#### Joogteynta:



- Barnaamijka Dayactirka ee Tayada Sare leh.



# ABUURITAANKA & DIB U HABEYNTA GURIYEYNTA *GURYAHA*

## KALE

Inkasta oo dhaqaalaha iyo waqtigu na xadidaya, MPHA marna ma dayaceyso fursada kasta “oo soo marta.” *HADAFKA: Abuuritaanka guryo cusub, isku dhafka nooxyada iyo maalgelinta.*

2018-2019	2020-2024	2025-2029	2030→
-----------	-----------	-----------	-------

**Heritage Park  
Bulshada  
Dakhligoodu Isku  
Dhafaan Yahay**  
(Oo ay ka mid tahay  
dhulka banaan)

- Tixgelinta in laga faa’iideysto fursadaha lagu iibsado dhul cusub (marxalado kala duwan) (2019)
- Soo saaritaanka Soo Jeedinta Qiimaha (RFP) ee bilowga qorshaha guud iyo nidaamka dib u horumarinta si ay ula saanqaado qorshaha khadka tareenka ee Buluugga ah/goobta gaadiidka laga raaco ee Van White. Ka qeyb gelinta dhamaan deganayaasha (kuwa la caawiyo iyo kuw aan la caawinba) ee qorsheynta iyo dhismaha bulshada. (2019/20)

**Fursada Isku  
Dhafka ee  
Maalgelineed**

- libshashada Guryaha Dadku Kiradooda Awodi Karaan (NOAH) hadba sida loo heli karo iyada oo lagu dhafayo nooca qeyb laga bixiyo.
- Raadinta sida ugu haboon ee looga faa’iideysan karo 1301 Bryant. (2018)
- La Shaqeynta bulshada ku dheredran wadada Plymouth (2018)
- Raadinta adeegsiga ileyska qoraxda (2018)
- Soo saarista RFP ee dib u dhiska xarunta dhexe ee MPHA ee xafiisyada iyo guriyeynta (2019)
- Raadinta fursadaha lagu hdiso dhulka banaan ee ku dhagan daaraha dhaadheer. (2020 iyo wixii ka dambeeya)
- Bedelidda Lacag Bixinta Guryaha ee Ku salaysan Mashruuca (PBV) (2018/2019)

**MHOP**

# WAXBARSHADA, SHAQAALEYNTA & CAAFIMAADKA

Guryuhu waa aasaaska u horseedi kara qoysaska deganaasho iyo isku filaasho dhaqaale iyo faydada qab. MPHA waxa ay adeegsanaysaa bixinta kirada ee mashruuca ku saleysan ee lala beegsado barnaamijyada guriyeynta.

## **Hal Abuurka Waxbarashada – HADAFKA:** *Horumarinta Gaaritaanka Hadafka Waxbarashada, tirada qalan jabinaysa*

- Abuuritaanka guriyeyn lacagta laga bixiyo ardayda /qoysaska noqda hoy la'aanta (dibjir). Lala shaqee Maamulka Waxbarashada ee Minneapolis, magaalada Minneapolis, Degmada Hennepin iyo urarada.
- Xoojinta wada shaqeynta urarada samafalka ee bulshada sida Northside Achievement Zone si loo helo qoysas fara badan.

## **Hal Abuurka Shaqada – HADAFKA:** *Kordhinta helitaanka shaqada iyo ku naqaashaha*

- Xoojinta barnaamijyada shaqada sida Summit Academy iyo TMZ si loo taageero baahida guryaha ee ardayda cusub ee dhameysta waxbarashada. Adeegsiga farasamada cagaaran ee shaqo abuurka.
- Abuuritaanka guriyeyn lagu gaaro isku filaasho si ay uga faa'iideystaan dadka doonaya inay iyagu yeeshaan.
- Dhameytirka iibinta 14 guryaha dhinaca isku haya ah ee Sumnerfield ee kirada-la-yeesho lagu dego iyo raadinta habab kale oo guryaha lagu yeesho.

## **Hal Abuurka Caafimaadka iyo Faydada Qabka - HADAFKA:** *Kordhinta helitaanka cafaaimaadka iyo adeegga dadweynaha.*

- Xoojinta wada shaqeynta iminka jirta iyo cabiraadda saameynta ay si wadajir ah ugu yeelan karto adeegga dadka deggan daaraha dhaadheer. La shaqeynta magaalada, degmada iyo ceymiska caafimaadka.
- Dib u abuuritaanka barnaamijka adeegga e deganayaasha oo dhan iyo ka qeyb galayaasha.
- Aqoonsiga xubnaha maalgaliyayaasha si loo abuurdo adeeg caafimaad oo ku saleysan taageeridda caafimaadka iyo adeegga ee guryaha MPHA.



## WANAAJINTA HAWGALKA

Maamulka wanaagsan waxa uu horseedaa yareynta kharashka. Lacagta soo harta waxaa loo adeegsan karaa ujeedooyin kale iyo horumarinta guryaha. Tani waa “fursad” lagu kordhiyo qiimaha hantida 12-ilaa-1.

Hal Abuurka Nidaamka iyo Habka La raaco – HADAFKA: Dib u hagaajinta nidaamka, horumarinta adeegga macaamiisha

- U guuritaanka hal meel oo laga maamulo IT iyo barnaamijyada guryaha iyo maareynta hantida.
- Dhaqangelinta si joogta ah horumarinta kooxaha waax kasta iyo hay’adda oo dhan.
- Kobcinta barnaamijka MPHA ee ku saleysan lacag bixinta mashruuca ee maareynta hantida.

Hal Abuurka Hawlgalka Hay’adda – HADAFKA: Dalacsiinta shaqaalaha; soo jiidashada iyo ku heynta shaqada

- Diyaarinta cududa shaqaale, tababarka, iyo istaraatiijiyad xirfad u sameyn – maareynta hantida, horumarinta guryaha, dhismaha guryo cagaaran (beekhaamiya shidaalka), maareynta guryaha, la shaqeynta guryaha, adeegga dadweynaha, isgaarsiinta.
- U diyaarinta hay’adda si ay ula saanqaado xaqiijinta shuruudaha iyo kirada iyo bixinta lacagta.
- Abuuritaanka shaqo ku tababarid iyo barnaamijka Section 3 ee shaqada.

Hal Abuurka Wada Shaqeynta iyo Wacyi gelinta – HADAFKA: Kobcinta Wacyi gelinta ee MPHA, saameynta iyo isu Laab furnaanta

- Adeegsiga **xaaladda Regional MTW** iyo horumarinta barnaamijka ee kordhineysa fursadaha guriyeynta.
- Dhiiri gelinta nidaam iyo ajanda degan oo fariimaha loogu gudbiyo magaalada, isgaarsiinta, degmada, gobolka iyo heer qaran.

# BA AAMIJKA DAYACTIRKA EE TAYADA SARE LEH.

Inta laga helayo hanti iyo awood ku filan oo dib u habeyn guud lagu sameeyo, MPHA waxa ay dhaqan gelineysaa jadwal dayactir ka hortag ah ee dhisme kasta.

- **HADAFKA:** *In la yareeyo dalabaadka dayactirka ee aan degdegga aheyn ama aanu nidaamku shaeyn; dhameystirka guryaha, yareynta ka guuritaanka guryaha.*
- Qodobada
  - Jadwal todobaadle, bil kasta, sadexdii biloodba mar, ama xilliyeed oo muujinaya waxqabadka.
  - Horumarinta dhulka laga galo guryaha, nadaafadda, la dagaalanka cayayaanka, dayactir guud oo lagu sameeyo nidaamka.
  - Liis hubin oo loo sameeyo guri kasta – oo muujinaya dayactirka iyo waxyaabaha laga bedelay oo duugoobay iyo xilliga rinjiyeynta.
- Dhaqangelinta
  - Aragtida shaqaalaha iyo deganayaasha ee arrimaha la xiriira dayactirka ee la xiriira sida barnaamijku u shaqeeyo.
  - Barnaamijka tijaabada ee Glendale iyo Horn Towers (2018)

# FURSADAHA MAALGELINTA

Si loo abuurto dhaqaale ku filan, MPHA waa in ay isticmaashaa dhamaan ilaha dhaqaalaha ee ay ka heli karaan dawladda dhexe, gobolka, degmada iyo magaalada, iyo ilaha gaarka ah iyo ururada.

## **Ka Caawinta**

### **Kirada/Wareejinta Maalgelinta**

Guryaha dadweynaha ee mashruuca ku saleysan sida uu dhigayo Gargaarka Bixinta Kirada (RAD) ama barnaamijyada HUD.



- Taasi waxa ay fursad siineysaa maalgelinta gaarka ah.
- Waxa ay ilaalineysaa awood u yeelashada laguna xadidayo heshiiska isticmaalka dhulka
- Waxa ay dhaqaajineysaa Ilaalinta Lacag Bixinta Guryaha ee Deganayaasha, qeyb balaaran laga bixinayo marka lala barbardhigo habka guriyeynta ee iminka.
- Kordhinta guryaha kirada lala wadaago sadex laab.
- Waxa ay ilaalineysaa awood u yeelashada laguna xadidayo heshiiska isticmaalka dhulka

## **Wareejinta Guryaha**

Hay'ad aan faa'iido doon aheyn ee MPHA



- Waxa ay awood u siineysaa in la sso saaro warqado lacageed oo damaanad u noqon kara mas'uuliyadda maaliyadeed.
- Taasi waxa uu qiimaheedu noqon kartaa \$95 oo hantida maalgelineed.
- Waxa la doonayaa in magalado smeyno damanad qaad mudada dheer ah.
- Adeegga deymaha waa in laga bixiyaa lacagaha la damaanad qaaday iyo kirada
- Guriyeynta dadka dakhligoodu yahay waxa ay xaq u yeelanayaan Maalgelinta la Xiriirta Barnaamijyada (PRI) ee ururada.

## **Nidaamka CAnshuurta ee Magaalada**



## **Deymaha gaarka Ah (Baniyada, Ururada)**



## SAAMEYNTA MAALIYADEED EE WAREEJINTA BANDHIGGA DAARAHAA DHAADHEER (GURI KASTA SANADKIIBA)

	Public Hsg	RAD	RAD/ LIHTC	TPV/LIHTC
Operating	Rent	3,000	3,000	3,000
	Operating Subsidy	3,000	3,000	<b>HAP Sub. 9,976</b>
	Cap. Grant		1,640	-
	Other	300	300	300
	Income	6,300	7,940	7,940
	Operating Expenses	6,600	6,600	6,600
	Replacement Reserve	-	450	450
	Expense	6,600	7,050	7,050
	Net Operating Income	(300)	890	890
Capital	Annual Cap. Grant	1,640	-	-
	Loan		11,000	11,000
	LIHTC Equity			80,000
	Total Capital Funding		11,000	91,000
	Capital Need Over 20 years	160,000	160,000	160,000
		<b>FARQI</b>		
		160,000	160,000	160,000
				<b>Loan 77,000</b>
				<b>Total 157,000</b>

SAAMEYNTA MAALIYADEED EE WAREEJINTA  
BANDHIGGA GURYAHA QOYSASKA (GURI KASTA SANADKIIBA)

	Public Hsg	RAD	RAD/ LIHTC	TPV/LIHTC	
Operating	Rent	5,400	5,400	5,400	
	Operating Subsidy	3,900	3,900	HAP Sub. 9,976	
	Cap. Grant		1,900	1,900	
	Other	300	300	300	
	Income	9,600	11,500	11,500	15,676
	Operating Expenses	9,600	9,600	9,600	9,600
	Replacement Reserve	-	450	450	450
	Expense	9,600	10,050	10,050	10,050
	Net Operating Income	-	1,450	1,450	5,626
Capital	Annual Cap. Grant	1,900	-	-	
	Loan		17,900	17,900	Loan 69,220
	LIHTC Equity			106,500	106,500
	Total Capital Funding		17,900	124,400	Total 175,720
	Capital Need Over 20 years	213,000	213,000	213,000	213,000

FARQI

## ISBEDELKA MAALGELINTA, EE AAN AHEYN BARNAMIYADA

Isbedelka Meelgelinta iyo barnamiyada ee ay dhawaanta HUD sameysay, MPHA waxa ay ka faa'iideysan kartaa fursadaha **dayactirka hantida ee wareejinta** ee ka bixinta kirada ee guryaha dadweynaha ee ku saleysan lacag bixinta ku saleysan maalgelinta mashruuca.

### ■ Dhibaatooyinka

- Gargaarka Maalgelineed ee HUD kuma filna baahida dayactirka guryaha.
- Habka Maalgelinta Guryaha Dadweynaha ma abuurto lacag caddaan ah oo la amaahan maro ama soo jiidata maalgelin Canshuur Dhaaf Loo Sameeyo Dadka Dakhliugoodu Hooseeyo (LIHTC).

### ■ Istaraatiijiyadda

- U wareejinta nidaamka guryaha dadweynaha mid ku saleysan mashruuc ee Qeybta 8 (Section 8.)

### ■ Waa maxay sababta loo wareejinayo.

- Qeybta 8 waxa ay horumarineysaa qeybta ay bixineyso HUD waana dakhli la isku haleyn karo.
- Dakhliga oo kordha waxa ay noo ogolaaneysaa amaahda iyo soo jiidashada maalgeliyayaasha LIHTC.

### ■ Waa maxay sababta xilligan:


- Maaso 2018kii waxa ay HUD daabacday ogeysiiska baabbi'inta/ka bixitaanka taasoo hagaajisay fursadaha wareejinta.
- Maalgelinta iminka waa mid aad ugu wanaagsan wareejinta RAD.

### ■ Sidee:

- Iyada oo lo marayo nidaamka wareejinta waxaa guryaha dadweynaha lagu wareejinayaa hay'ad aan faa'iido doon aheyn oo hoos timaadda MPHA waxeyna bedeleysaaa nidaamka bixinta kirada ee mashruuca ku saleysan.

## ISBEDELKA WADAAGGA EE LAGU TALINAYO

15ka sano ee soo socda, MPHA waa in ay dhaqan gelisaa qorshe maalgelin si loo joogteeyo guryaha dadka dakhligoodu yar yahay ee mustaqbalka. Ka dib marka la wareejiyo arrimaha maaliyadda guryaha, MPHA waxa ay maamuleysaa guryaha sida “guryaha dadweynaha” ee deganayasha.

Koox	Guryaha	Cutubyada	Guryaha Lala Wareejiyey Maalgelinta	Mashruuc a Canshuur Dhaafka
Kooxda A	Guryaha kala baahsan (firirsan)	 730	100% (Abuureysaa Bixinta Kirada ee Ilaalinta Deganayaasha)	Maya
Kooxda B	Elliot Twins Apartments (Guryaha isku dhagan ee Elliot) Glendale	 358	100% (Abuureysaa Bixinta Kirada ee Ilaalinta Deganayaasha)	Haa
Kooxda C	1710 Plymouth Ave 809 Spring St NE 1900 3 <sup>rd</sup> St NE	 148	100% (Abuureysaa Bixinta Kirada ee Ilaalinta Deganayaasha)	Haa
Kooxda D	Daaraha Dhaadheer ee kale	 4,684	25% (Abuureysaa Bixinta Kirada ee Ilaalinta Deganayaasha) 75% Ku saleysan lacag bixinta Mashruuca RAD	Haa

## GUNAANADKA MAALIYADDA EE ISTARAATIJIYADDA WAREEJINTA

Kuwan waa qiyaas horudhac ah iyo hadafka maalgelinta ee loo adeegsanayo qorsheynta guud. Waxaa lagu saleeyey muddo 20 sano ah Milyan

Koox	Guryaha	Cutubya da	Kharadhka Dhismaha Guud (TDC)	Lacagta Deynta Laga Filayo	Faa'iidada Canshuur Dhaafka (LIHTC)	Faraqa Maalgelinta
Kooxda A	Guryaha kala baahsan (firirsan)	730	\$125	\$51	\$0	\$74
Kooxda B	Guryaha Elliot Glendale	358	\$107	\$25	\$62	\$20
Kooxda C	1710 Plymouth Ave 809 Spring St NE 1900 3 <sup>rd</sup> St NE	148	\$42	\$6	\$23	\$13
Kooxda D	Daaraha Dhaadheer ee kale	4,684	\$825	\$100	\$428	\$297
<b>Wadarta Qeybtan</b>		<b>5,920</b>	<b>\$1,099</b>	<b>\$182</b>	<b>\$513</b>	<b>\$404</b>

### Faraqa Maalgelinta ee Soo Suurogalka

Lacagta Laga Filayo Canshuurta Guryaha \$95

Dadaweynaha

Kobcinta MTW \$24

Canshuurta iyo Kobcinta MTW \$119

**Faraqa soo Haray \$285**



LIFAAQ



# GUNAANADKA DHAMAAN HAL ABUURKA DIB U DHISKA

	2018-2019	2020-2024	2025-2029	2030→	
Guryaha kala baahsan (firirsan)					<b>TILMAAME:</b>  Dib U habeynta ama dhismaha Bekhaaminta Tamarta   Barnaamijka Dayactirka ee Tayada Sare leh.   Dhismaha   Qorsheena mashruuca Ku Saleysan Bulshada   Dhaqaalaha iyo Maalgelinta
Guryaha dhinaca isku haya ee Glendale					
Guryaha dhinaca isku haya ee Minnehaha					
Elliot Twins Apartments (Guryaha isku dhagan ee Elliot)					
1710 Plymouth Ave 809 Spring St NE 1900 3 <sup>rd</sup> St NE					
Daaraha Dhaadheer ee kale					
Heritage Park Bulshada Dakhligoodu Isku Dhafan Yahay					
Fursada Isku Dhafka ee Maalgelineed (PDO) & MHOP					

# DAYACTIRKA WAA MUHIMADEENNA KOOWAAD

MPHA waxa ay raadineysaa maalgelin ay ku dayactirto hantideeda ama ku bedesho dhismayaal cusub kuw ahadda jira oo ay kordhiso mugga , ku noolaashaha iyo joogteynta.

*Kala Siinta  
Mudnaanta:*

1<sup>st</sup>

Da'da &  
Xaalladda  
dhismaha oo  
aad u liidata



Aan dhawaanta  
maalgelin lagu  
sameyn



**Dib oo  
dayactiray ama  
loo dhisay**

2<sup>nd</sup>

Helitaanka la heli karo dhul banaan



**Ku daridda  
dhisme cusub**

3<sup>rd</sup>

Da'da &  
Xaalladda  
dhismaha oo  
aad u liidata

Kharash fara  
badan oo ku  
baxay  
maamulidda

Dhul la  
heli karo



**Bedelidda iyo  
ku daridda  
guryo cusub**

# QODOBADA SALDHIGGA U AH DIB U DHISKA IYO MAALGELINTA EE MPHA

*Waxaa oglaaday Gudiga Maamulka ee MPHA 24kii May 2017*

**MPHA waxa ay ka qeyb qaadanaysaa barnaajib dadweyne, leh qorshe balaaran oo lagu qiimeynayo baahida oo waafaqsan fursadaha dhamaan guryaha ay leedahay MPHA.** Nidaamka laba ujeedo ayaa laga leeyahay:

- Si loo xaqiijiyo qorshaha mudada dheer ee dhismayaasha iyo maaliyadeed ee guryaha ay MPHA leedahay.
- Kordhinta ku noolaashaha iyo qiimaha suuq ee guryaha, iyada oo loo smeynayo naqshad sare.

Ujeedada MPHA waa in ay diyaariso guryo daboolo baahida iminka taagan iyo tan la saadaalinayo ee hoyga ee dadka dakhligoodu hooseeyo ee Minneapolis, iyo daycatirka—iyo marka ay suurogal tahay kordhinta—fursadaha guriyeynta ee dhamaan xaafadaha Minneapolis.

MPHA waxaa ka go'an in ay ka shaaqeyso danaha deganayaasha MPHA gaar ahan kuwooda nugul, oo ay ka mid yihiin dadka da'da ah, naafada, dadka dakhligoodu ka hooseeyo 30% heerka dakhliga, qoysaska soo haajira (sharci ku jooga wadanka).

MPHA waxa ay dhiirigelineysaa ka qeybgalka deganayaasha iyo bulshada iyada oo loo marayo qorsheyn iyo nidaam dhaqan gelin, lana raadinayo iskaashiga iyo wada shaqeynta Magaalada Minneapolis, hay'adaha kale ee dawladda, hay'adaha u dooda guriyeynta marka loo baahan yahay, iyo horumarinta guryaha dadku awoodo.

MPHA waxa ay dooneysaa in deganyaashu ka qeyb qaataan oo ra'yigooda ka dhiibtaan qorsheynta iyo naqshadeynta. Haddii ay MPHA hesho fursad ay dib ugu dhiso guriga oo horey aanay hay'addu ugu sii talo gelin, MPHA waxaa ka go'an in ay ka talo geliso deganayaasha sida ugu dhaqsaha badan oo si furan looga doodo fursadaha suurogalka ah.

MPHA waxa ay ka qeyb galeinysaa xubnaha magaalada ee ay khuseyo dhamaan go'aanada la xiriira guryaha ay MPHA hirgelineyso si u waafqasanaadaan ujeedada MPHA. *Hadafka Maamulka Guryaha ee Minneapolis (MPHA) waa nuu dhiirigeliyo oo aan dhaqangeliyo guryo si hufan loo maamulay oo bulshada isku dhafka ah, dadka dakhligoodu yar yahay iyada oo maanka lagu hayo faydada qabka shaqsiyaadka, qoysaska iyo bulshada aan u adeegno.*

MPHA waxa ay dooneysaa in ay jiraan dhamaan guryaha dadweynaha ee iminka ka jira. Haddii ay dhacdo inuu gacanteeda ka baxo guri ka mid ah guryaha ay maamusho dib u dhiska dartiis, waxaa la hiegeleinayaa meel ka mid ah magaalada mid kale oo lagu bedelayo. Inta suurogl ah, MPHA waxa ay dhiseysaa guryo lagu bedelayo kuwa la dumiyey ee iminka jira. MPHA waxa ay abuureysaa qorshe lagu abuuraayo dumin iyo dib u dhis oo si tartiib tartiib ah oo waqtiga la socdo, iyada oo isla goobta laga dhisayo guri casri ah oo lagu bedelayo kan la dumiyey.

## **QODOBADA SALDHIGGA U AH DIB U DHISKA IYO MAALGELINTA EE MPHA – SII SOCDA**

*Waxaa oglaaday Gudiga Maamulka ee MPHA 24kii May 2017*

MPHA waxaa ka go'an joogteynta daaraha dhaadheer iyada oo xadideysa duminta guryahaas kana shaqeeyaan waxyaabaha muhimka ah si wax looga bedelo qaabka dhismaha ama goobaha dadku wadaago si da ku xusan naqshadda, qolalka lagu daray, balaariyey goobaha dadku wadaago iyo waxyaabaha kale ee dheeraadka ah.

MPHA waxaa ka go'an in ay naqshada ku darto mid guryaha lagu gaari karo si fudud kana dhigi kara in guryaha muddo dheer la deganaado oo lagu noolaado.

MPHA waxa ay qorshaha ku dareysaa qorshe guud ee dib u dajin ee guri kasta oo db u habeyntu saameyn ku yeelato. Qorshaha dib u dajinta waxaa lagu daraya fursado kala doorasho ee dib u dajin iyo faahfaahin la xiriirta iyada oo MPHA ay gacan ka geysaneyso (sida goobaha gaadiidka la dhigto, furfurka alaabada, nooca bixinta kharashka ee dadka ay saameynta ku yeelatay ama adeegga ay ka wada hadlaan deganayaasha iyo MPHA.) Gargaarka la bixinayo waa mid guuritaanka iyo dib u soo noqoshada.

MPHA waxa ay dooneysaa in dadaalka dib u dhiska uusan sabab u noqon in deganayaasha MPHA aysan guri la'aan ku dhacin Qorshaha dib u dajinta ee lagala gorgortamay deganayaasha waxaa ka mid ah in ay xaq u leeyihiin in guryahooda dib loogu soo celiyo.

MPHA waxaa ka go'an in joogteyso barnaamijyada ka qeyb gelinta iyo taageerada deganayaasha: hay'adaha magaalada ee deganayaasha (MHRC), Project lookout, Isku Dhafka Wadajirka ah, Hal Abuurka Dadweynaha ee Isku Filaashaha, Mashruuca Makiinadaha Dharka Lagu Dhaqdo ee Daaraha Dhaadheer, Makiinadaha cabitaanka iyo Adeegyada kale ee ka jira dhismaha (sida Volunteers of America).

Dib u dhiska ka dib, MPHA waxaa ka go'an in ay gacanta ku heyso maamulka iyo dayactirka dhismayaasha oo dhan. Gacan ku heynta waa mid wax laga bedeli karo gaar ahaan guryaha dadka u baahan daryeelka gaarka iyo kuwa gacanta lagu hayo oo laga yaabo in gacan sadexaad ay maamulaan. Haddii dib u dhiska guri ay waajib ka dhigeysa in uu ka baxo maamulka iyo dayactirka MPHA, waxa ay noqoneysaa arrin laga talo geliyo deganayaasha qorshada dib u dhiska ka hor.

Haddii ay dhacdo in MPHA ay dib u dhiska u xilsaarto shirkad ganacsi ama mid aan faa'fiido doon aheyn, MPHA waxaa laga doonayaa in shirkadda adib u dhiska fulineysa noqoto mid ka duuleysa mabaadi'da MPHA oo ay ka mid yihiin, in marka y suurtoagal tahay shaqooyinka dhismaha, adeegga deganayaasha iyo fursadaha laga qeyb geliyo deganayaasha. Wada shaqeynta waa in lagu xusaa heshiiska dib u dhiska kaasoo ah mid si joogta ah u dhaqan gelinayaan guryo dadku awoodo soona celin kara hantida gashay si cad ay uga faaiideysanayaan MPHA iyo deganayaasha.

# NAGSHADEYNTA AASAASIGA AH EE GURYAHA

- Dhismayaal adeegsada tamar yar
- U baahan lacag yar si loo maamulo
- Hagaajinta tayada hawada
- Raad yar oo MPHA ku yeelato kaarboonka magaalada

**Heerka  
Beekhaam  
inta  
Shidaalka**

**Heerka  
nolasha**

**Isku  
Xirnaashaha  
Bulshada**

- Isticmaalka dhulka oo si haboon looga faa'iideysto
- Hagaajinta dhismayaasha sii duqoobaya
- Naqshadda oo mid fudu laga dhigo
- Goob wax lagu keysado oo maanka lagu hayo

- Xarun u noqda xaafadaha ku xeeran
- Dhaqdhaqaaqa qoysaska
- Xiriirka mulkiilayaasha

# TUSAALE KU SAABSAN NAQSHADEYNTA DAARAHA DHAADHEER



Tusaale bedelidda daaraha dhaadheer ee horey loo dhisay

Xigasho: Intep

# TUSAALE NAQSHADDA GURYAHA DIB LOO DAYAC TIRAYO



*Ka hor*



*Ka dib*

*Tuseaale Dib U habeynta guryaha  
kelida u taagan ee qoysaska*

*Xigasho: Intep*

- Makiiba hal guri dib loo dayactiro
- Aqoonsiga hal goob oo laga dhiso guri afar waax ka kooban tamartana isu dheelitira
- Raadinta hay'adaha nala shaqeeya haddii ay damaanad qaadi karaan alaabada dhismaha iyo farsamada casriga ah.
- Qabashada Kulanka Naqshadeynta ee deganayaasha.
- Abuuritaanka dhisme u taagan daaraha dhaadheer oo faahfaahin ka bixi